Somaliska

Quseeyso canugaaga 1 ilaa 6 sano:

Dugsiga xannaanada iyo fasalka ardeyda lix sano jirka

Skolverket

EFGH
IJKL
MNOP
QRS
UVX

Sidaan buu yahay nidaamka dugsiyada iswiidhishka.



Dugsiga sare
dhallinyarada 16 ilaa 20 sano, ma ahan qasab

Dugsiga aasaasiga
dhallinyarada 7 ilaa 15 sano, waa qasab

Dugsiga aasaasiga-iyo dugsiga sare oo ardeyda maskax-doodu gaabiso
carruurta iyo dhal-linyarada oo maskax-doodu gaabiso 7 ilaa 20 sano

Dugsiga xilliga firaaqada
carruurta 6 ilaa 13 sano, qasab ma ahan

Fasalka ardeyda lix sano jirka ah
carruurta 6 sano qasab ma ahan

Dugsiga xannaanada
carruurta 1 ilaa 6 sano, qasab ma ahan

Wixi ka bilaawdo markuu canugaada buuxiyo hal sano, wuxuu kuu dhigankara dugsiga xannaanada. Ciyaarta aad muhiim u tahay markey noqoto dugsiga xannaanada. Markuu canuga buuxinaayo 6 sano, bey dhammaan carruurta bilaabikaran fasalka ardeyda lix sano jirka. Dugsiga xannaanada iyo fasalka ardeyda lix sano jirka waa arrin ah tabarruc.

Dhammaan carruurta waxey bilaabaan dugsiga aasaasiga markey gaaraan 7 sano, oo in ey dhigtaan waa qasab. Sharciga oo waajibaadka dugsiga wuxuu ardeyga qasab ku tahay fasalka 1 ilaa 9, oo waa sagaal sano.

Markaas kadib dhallinyarada waxey saddax sano dhigtan dugsiga sare. Dhammaan xaq bey u leeyihiin iney bilaabaan dugsiga ilaa sanadka ey buuxinaay-aan 20 sano. Dugsiga sare ardeyga wuxu u diyaarin inuu dhigankaro waxbarasho jaamacadeed, ama toos shaqo u bilaabo.

Yaa dhigankaro dugsiga xannaanada iyo fasalka ardeyada lix sano jirka?

Miyaa shaqeysaa ama waxbarasho dhigataa? Markaas canugaada wuu dhigan karaa dugsiga xannaanada dhammaan maalintaas oo dhan laga soo bilaabo markuu canuga buuxiyo hal sano. Waa arrin oo xaq u leedihiin. Hadii aadan shaqeyn ama waxbarasho aadan dhigan canugaada wuxu dhigan karaa dugsiga xannaanada oo ah dhowrka saacadood maalintiiba, wixi laga soo bilaabo markuu canuga jiro saddex sano.

Markuu canuga buuxiyo 6 sano wuxu xaq u leeyahay inuu dhigankaro fasalka ardeyada lix sano jirka. Dhigashada fasalkaas ma ahaan qasab, oo ardeyga baa loo sii diyaarin waxbarashada oo dugsiga qasabka. Canuga wuxu dhax joogi ama agteeda joogi dhismada dugsiga qiyaas ahaan maalintiiba saddex saacadood. Hadii aad shaqeysid ama waxbarasho aad dhigatid canugaada wuxu sii joogikara dugsiga xilliga firaaqada inta maalintaas ka harsan.

Carruurtu waxey dhigtaan dugsiga xannaanada iyo fasalka ardeyada lix sano jirka isniin ilaa jimco. Sabti, axad iyo maalmaha fasaxa waa maalmo oo dugsiga xannaanada xiranyahay.

Carruurta oo waalidkood shaqeeyaan ama waxbarasho dhigtaan

Dhammaan caruurta oo dhan qiyaas ahaan saddax saacadood maalintiiba (dugsiga xannaanada oo guud)

Dhammaan carruurta (Fasalka oo ardeyda lix sano jirka)

Dugsiga ”rasmiga” baa bilaabanaayo

Waa imisa lacagta lagu dhigto?

Waa lacag la'aan inuu canugaada dhigto dugsiga xannaanada oo dhowrka saacadood maalintiiba, wixii laga soo bilaabo markuu canuga buuxiyo saddex sano. Laakin waxaa la bixin lacag hadii canugaada dhigto dugsiga xannaanada oo ka yar yahay saddex sano, ama hadii aad u baahantahay inuu canugaada dhigto saacado badan maalintiiba. Degmadaada baa iska leh go'aanka inta oo ahaanaayo kharashkaas.

Waa lacag la'aan in la dhigto fasalka ardeyada lix sano jirka.

Qiimaha **0:-** **0:-**

Dugsiga xannaanada oo carruurta 1 ilaa 6 sano
Degmada baa iska leh go'aanka qiimaha kharashka oo la bixinaayo inta oo ahaanaayo

Dugsiga xannaanada oo guud 3 ilaa 6 sano
Wax lacag lama bixiyo (saddax saacadood)

Fasalka oo ardeyda lix sano jirka 6 ilaa 7 sano
Wax lacag lama bixiyo

Hadafka oo dugsiga xannaanada

Ujeedada dugsiga xannaanada waxaa waaye gacanta koowaad in canugaagu oo horumar suubiyo iyo inuu carruur kale la kulmo. Taasna waxey kuu suurtagalin inaa adiga shaqeysankartid ama waxbarasho dhigankartid.

Dugsiga xannaanada aad bey mihiim u tahay ciyaartu siduu canuga horumar u suubinkaro iyo wax u barankaro. Canuga wuxuu tijaabin oo adeegsan heesida, daansiga, wax sawirida iyo wax ranjiyeenta. Luqada waa muhiim, tan iswiidhishka iyo luqada hooyo. Sidoo kale dhaqankiisa.

Dugsiga xannaanada waa inuu ahaadaa meel kalsooni leh, farxad iyo waxbarasho. Waxbarashadu waa in ey ahaataa mid bani'aadamka isku sinaanshada ku dhisan iyo in gabdhaha iyo wiilasha ey haaystaan isku fursad markey noqoto horumarinta noloshooda.

Hadafka oo fasalka ardeyada lix sano jirka

Markuu canugaagu buuxiyo lix sano wuxuu xaq u leeyahay inuu dhigankaro fasalka ardeyada lix sano jirka. Ka qeyb-qaadashada ma ahaan qasab oo waxaa loo sii tababari waxbarashada oo dugsiga aasaasiga, oo dhammaan caruurtu bilaabaan markey qiyaas ahaan gaaraan toddobo sano.

Ciyaarta iyo wax abuurista waa muhiim. Laakin waxa kale oo muhiim ah in la fadhiyo, wax la dhegeysto iyo wax la barto. Canuga wuxu ku tababaran inuu dadka kale xushmeeyo, iyo inuu horumar ka gaaro luqadiis iyo aqlijan habka fikiraada xisaabta.

Sida camal dugsiga xannaanada waa in dhammaan gabdhaha iyo wiilasha ey haaystaan isku fursad markey noqoto horumarinta noloshooda.

Dugsiga xannaanada oo mid gaar ah ama mid degmada mas'uul ka tahay?

Degmadaada baa mas'uul ka ah inuu canugaagu boos ka helo dugsiga xannaanada. Adiga waxa codsiga u dirsan degmadaada oo waxa u sheegi inaa canugaagu boos uga rabtid dugsiga xannaanada. Degmada markaas waxaa waajib ku ah in canugaagu boos ku martiqaado afar bilood gudaheeda, uu booskaas ahaado mid adiga kuu dhow inta suurtagal ah.

Adiga waxa kala doorankarta dugsiyada xannaanada ey degmada mas'uulka ka tahay ama dugsiyada xannaanada oo gaarka ah. Dugsi xannaano oo gaar ah waxa iska lahaan karo waalidiinta, shaqaalaha ama shirkad. Shuruudaha waa isku mid dhammaantood, oo degmada baa mas'uul ka ah inuu canugaagu kaalsooni dareemo iyo in si wanaagsan loo dareeylo.

Waxaad tahay muhiim

Dugsiga xannaanada iyo fasalka ardeyada lix sano jirka waxaa loogu talagalay canugaagu. Wada xiriirka maalinkasto waa muhiim. Macallimiinta dugsiga xannaanada iyo macallimiinta kale baa warbixin kaa siinaayaan meesha ey xaalada canugaagu ku dambeyso, markasto canuga soo dooneysid iyo keeneysid. Ku fikir inaa adiga xitaa u sheegtid shaqaalaha warbixinta ey u baahanjihiin. Weeydii hadii aad wax su'aal ka qabtid.

Dhowr jeer sandkasto baa adiga iyo macallinka guuni u wada kulmeysiin, oo waxaa ka wada hadleysiin sida canugaagu meesha u arko, hadii uu ka helo iyo hadii uu horumar suubinooyo. Kulanka waalidiinta baa waxa isla kulmaayaan macallimiinta iyo waalidiinta oo waxa laga wada hadli shaqada iyo dugsiga waxa ey ku talo jiran iney suubindoonaan.

Beställningsuppgifter:
Fritzes kundservice
106 47 Stockholm
Telefon: 08-690 95 76
Telefax: 08-690 95 50
E-post: skolverket@fritzes.se

Beställningsnr: 13:1368

Bilder: Folio, Michael McClain,
Matton, Johnér, iStock
Illustratör: Helena Halvarsson

Grafisk produktion: Jupiter Reklam
Tryck: Åtta45

Skolverket
skolverket.se/nyanlanda